# Xaashida Macluumaadka Sonkorowga ee Waalidiinta iyo Daryeelayaasha

**Diabetes Information Sheet for Parents and Carers**

Waxaad ogaatey in ilmahaaga lagu sheegay sonkorowga nooca 1aad (type 1 diabetes).
Ku mahadsanid bixinta macluumaadkan.

In kastoo kaalinta ugu weyn ee dugsigu ay tahay inuu siiyo waxbarasho, waxaan doonaynaa in ilmahaagu ahaado mid raaxaysan oo ku faraxsan dugsiga iyo in adiguna aad dareento isku-klasoonaan in ilmahaagii aad loo daryeelayo. Maamulaha dugsiga wuxuu kaala shaqayn doonaa si loo diyaariyo qorshaha daryeelka caafimaadka shakhsiga ah ee ilmahaaga. Duruufaha qaarkood maamuluhu wuxuu uga baahan karaa taageero dheeraad ah haya'daha dugsiyada khuseeya si loo ogaado habka ugu fiican ee baahiyaha ilmahaaga wax looga qaban karo. Haddii aad raadinaysid inaad ilmahaaga ku qorto ama horeba ilmahaagu ugu qornaa waxaa dhici karta xoogaa daahid ah marka la diyaarinayo howshaas.

Si loo qabto baahiyaha ilmahaaga dugsigu wuxuu qaadayaa tallaabooyinka soo socda:

## TALLAABADA 1aad. Diyaarinta qorshaha daryeelka caafimaadka shakhsiga ah

Qorshahan waxaa ku jiri doona:

- Faahfaahinta xaaladda sonkorowga ilmahaaga
- Sawirka ilmahaaga
- Tallaabooyinka uu dugsigu qaadayo si uu ugu taageero ilmahaaga inay ku maareeyaan sonkorowgooga markay dugsiga joogaan iyo inay yareeyaan khatarta sonkorta oo kacda ama sonkorta oo dhacda (heerarka gulukooska dhiigga oo hooseysa ama sarraysa)
- Diyaarinta shaqaalaha dugsiga si ay u caawiyaan ilmahaaga tusaale ka-caawinta ardayga maaraynta xaaladda caafimaadkooda iyo samaynta cuntooyinka gaarka ee ku habboon
- Qorshaha ku-talagalka degdegga ah
- Faahfaahinta xiriirkaaga markii ay xaalad degdeg ah jirto iyo kuwa qof kale markii aan adiga lagu heli karin
- Diyaarinta sawirka iyo macluumaadka ku saabsan baahiyaha ilmahaaga si loogu hayo meelo laysla ogolaaday oo dugsiga ka mid ah
- Saxiixaaga iyadoo uu la jiro kan maamulaha, si loo muujiyo in faahfaahinaha la akhriyey iyo in adiga ilmahaagaba lagala tashaday samaynta qorshaha.

| |
|---|
| Dhaqtarka daaweeya ilmahaaga wuxuu u baahan doonaa in macluumaadka laga siiyo nooca xaaladda sonkorowga iyo daaweynta ku-habboon iyo daaweynta degdegga ah. |

**OGSOONOW**: waalidiinta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay tixgeliyaan waqtiyada markaas oo ardaygu uusan ku jirin daryeelka ama haynta dugsiga iyo in sida ugu habboon loo qorsheeyo. Tusaale ahaan, marka dugsiga la aadayo ama laga soo baxo iyo ka-hor iyo ka-dib daryeelka dugsiga.

## TALAABADA 2aad. Dokumanti-samaynta iyo siinta daawaynta la-qoray

Daaweyn kasta oo uu u baahan yahay ilmahaagu waxaa laga doonayaa codsi qoraal ah oo loo qoro maamulaha oo ay ku jiraan tilmaamaha daawo-siinta. Waxaa lagaa doonayaa inaad dugsiga keento daawooyinka iyo cuntooyinka si habboon magaca ugu dul-qoran yahay (tusaale qalabka lagu baaro heerka gulukooska dhiigga iyo qalinka insuliinka).

Waxaa lagaa codsan doonaa inaad soo diyaariso qalabaka sonkorowga ilmahaaga si ay diyaar ugu ahaato in la isticmaalo maalin-dugsiyeed kasta.

Haddii aad doonaysid in ilmahaagu inuu asagu iskiis daawada u qaato codsi qoraaal ah ayaa loo baahan doonaa. Maamulaha ayaa ka masuula go'aan ka qaadashada in ardayga uu iskiis si ammaan ah daawada isku siin karo. Maamulaha waxaa dhici karta inuu raadiyo talooyin daaweyn oo arrinta la xiriirta.

Intaas waxaa raaca, dugsiga waxaa saaran waajib daryeel si uu u qaado tallaabooyinka macquulka ah si loo hubiyo in iskiis isku daaweyntu loo qabto si ammaan ah. la-socod badan ayaa loo baahan yahay xaaladaha halkaas oo ardaydu aysan qaan-gaar ahayn ama awood lahayn ayna aad ugu tiirsan yihiin caawimaadda qof waayeel ah.

Markii ay ardaydu iskood daawada u qaadan karaan, ka-qaybgalkooda samaynta habraacyo ammaan ah ee qaadashada daawada loo soo qoray waxay gacan ka gaysanaysaa helidda iskaashigooda. Tusaale ahaan, ardayda qaarkeed ayaa door bidi kara inay iskood isugu daaweeyaan fasalkooda dhexdiisa.

Fadlan dugsiga talo sii iyo weliba haddii ilmahaagu xirto jinjimaha feejignaanta daaweynta ama qoolka. Diabetes Australia-NSW waxay ku talinaysaa in ardaydu xidhaan mid ka mid ah jinjimahaas.

## TALAABADA 3aad. La-xiriiridda dhaqtarkaaga ku daaweeeya

Dugsigu wuxuu doonayaa ogolaanshahaaga si uu ula xiriiro dhaqatarkaaga ku daaweeya/xubnaha kooxda daryeelka sonkorowga ilmahaaga haddii loo baahdo. Waxaa lagu siin doonaa *Awoodsiinta si loola xiriiro Dhaqtarka Daaweynta (Authorisation to Contact Medical Practitioner)* uuna u soo buuxiyo.

### Adeegga Turjumaanka Taleefanka ah

Haddii aad doonaysid macluumaad dheeraad ah fadlan la soo xiriir Maamulaha.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan si uu kuu caawiyo, fadlan waxaad ka wacdaa Adeegga Turjumaanka Taleefanka ah 131 450 waxaadna weydiisataa turjumaanka luqaddaada ah. qofka xiriiriyaha khadka ah ayaa wacaya dugsiga soo gelinaya turjumaanka khadka si uu kuugu caawiyo wada-hadalka. Waxba lacag lagaa qaadimayo adeeggan.

Mahad-celin. Qoraalkan waxaa la sameeyey ayadoo lala kaashanayo Diabetes Australia-NSW.